



Xusuusin: Ardayda Da'doodu Tahay 16 sanno iyo Wixii Ka Weyn Waxa ay Heli Karaan Tallaalka **COVID-19**

Maayo 10, 2021

Qoysaska Dugsiga Sarre ee PPS,

Waxaan halkan mar labaad qoysaska ku xasuusineynaa in tallaalka COVID-19 ay ardayda da'doodu tahay 16 sano iyo wixii ka weyn iyo waliba xubnaha qoysaskuba ay maalinta Arbacada ee bisha Maayo 12 ay ka heli karaan marka ay tagaan Oregon Convention Center tallaalkaasi aan kor ku soo sheegnay.

Haddaba si aad u qabsatid ballanka tallaalka, [fadlan waxaad gujisaa halkan](#) si aad u hesho foomka ballanta.

Haddii adiga ama ardaygaagu aad jeceshihiin inaad u sii raacdaan ama ka soo raacdaan gaadiidka loogu talofalay Convention Center maalinta Arbacada, fadlan waxaad ku sheegtaa meesha foomka ku taaal ee lagugu weydiinayo inaad gaadiid u baahan tahay iyo in kale. Waxa ay basasku ka bixi doonaan iskuuladan soo socda iyaga oo laga raaci doono, laakiin shardi kuma xidhno in ardaygaagu uu iskuuladani wax ka barto sidii aad u raaci lahayd gaadiidkan, taasi macnaheedu waxa weeye gaadiidkan waad raaci kartaa haddii aad tallaal ka soo qaadaneyso Convention Center.

Gaadiidka basasku waxay ka baxayaa maalinta Arbacada Iskuuladan soo socda:

Roosevelt – 8:35 subaxnimo.

McDaniel @ Marshall – 9:00 subaxnimo.

Alliance @ Meek – 9:05 subaxnimo.

Franklin – 9:40 subaxnimo.

Wells-Barnett – 10:15 subaxnimo.

Sidii tobobaadkii aan soo dhaafnay, waxaa jiri doona shaqaale ka tirsan PPS oo idinka caawin doona wixii su'aalo ah marka aad joogtaa Convention Center kuwaasi oo aad u baahan tahay in la idiinka jawaabo.

Tani waa hab wanaagsan oo aad ku heleysaan tallaalka, waxaan rajeyneynaa inaad fursadani aad ka faa'iideysantaan!